

Daryeelida Carruurta Da'da Iskuulka ah Maadaama Dugsiyadu Dib Loo Furayo Talaabooyinka Guusha: La Shaqeynta Dugsiyada iyo Qoysaska

Samee Qorsho

1. Oggaaw inaad caawin kartid carruurta da'da iskuulka ku jirta, caawintaas oo ay ku jiraan bixinta boos banaan iyo khad loogu talagalay waxbarashada fog/khadka ah. Haddii aad hayso labaduba, go'aanso inta carruur ah ee da'ada iskuulka gaadhay ee aad qaabili karto.
2. Ka hubi shati-bixiyahaaga si aad u xaqiijiso inaad dhammaystirtay dhammaan talaabooyinka loo baahan yahay si loogu adeego carruurta da'da iskuulka ku jirta.
3. La xirii bixiyeyaasha kale ee xanaanada carruurta ee ka jira bulshadaada si aad u wadaagtaan macluumaad, waxbarashada, talooyin iyo macluumaadka boosaska bannaan. Tusaale ahaan, haddii aad boos u hayso ilmo yar, adeeg-bixiye deris kula ah ayaa kugu soo hagi kara waalid raadinaya daryeelka dhallaanka haddii aysan iyagu haysan boos banaan.
4. Macluumaadkaaga adeeg-bixinta ka cusbooneysi CCA ee Xarunta Qoyska WA/barnaamijka gudbinta daryeelka carruurta adigo u diraya iimayl ImpactAdmin@wa.childcareaware.org si aad u codsato linkiga macluumaadkaaga adeeg-bixinta si aad u cusbooneysiiso, iyo sidoo kale [Hubinta Daryeelka Carruurta](#) ee Washington, oo ay bixiso Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, si aad u muujiso inaad u adeegayso carruurta da'da iskuulka gaadhay.

La Shaqeynta Iskuulada

1. Weydii maamulayaasha inay martigeliyaan kulan lala yeesho barnaamijyada daryeelka carruurta ee deegaanka si loo dhiso iskaashi waxbarasho oo wax looga qabto baahiyaha ardayda.
2. Iskuulada deegaankaaga ayaa laga yaabaa inay kula soo xiriiraan si ay isugu duwaan. Noqo mid soo dhaweyn leh oo diyaar u ah inaad la wadaagto awooddaada iyo qorshahaaga daryeelka carruurta da'da iskuulka ah.
3. Weydiiso jadwalada iskuulka si ay kaaga caawiso jadwal u samaynta barnaamijka, oo dhiirrigeli qadada guud iyo/ama fasaxyada nasashada. Weydiiso maamulayaasha iskuulada deegaanka inay kugu daraan qorshayaashooda isgaarsiineed si markaa laguula socodsiiyo jadwalada iyo isbeddelada ardayda.
4. **Oggow** haddii degmada iskuulada deegaanka ay tababarrada teknoolojiyadda khadka ah siiso qoysaska iyo bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee u adeegaya carruurta da'da iskuulka ah, oo ka qaybgal tababarka haddii la bixiyo.
5. La xirii agaasimaha manhajka degmada iskuulada deegaankaaga si aad u hesho macluumaad, ilo iyo taakuleyn dhanka waxbarashada fog/khadka ah. Ku dhiirrigeli dheelitirka kooxaha khadka wax ka barta iyo shakhsiyadka ofleenka wax ku barta labaduba si markaa carruur badan aysan dhammaantood khadka toos u wada gelin hal wakhti.
6. Si joogto ah u fiiri bogga iyo baraha bulshada degmada iskuulada si aad u xaqiijiso inaad mar walba ka warqabto isbeddelada jadwalada iskuulada.

Iskaashi la samee qoysaska

1. Ka codso waalidiinta inay kugula xiriiriyaan macallinka(miinta) ilmaha si adiga, macallinka iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta aad sida ugu fiican u taageertaan waxbarashada ardayda. Waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda ha saxiixaan foomka sii-deynta kaas oo oggolaanaya wada-xiriirkaan in la sameeyo.
2. U samee liis alaab waalidiinta/mas'uuliyiinta carruurta da'da iskuulka gaaray, oo ay ku jiraan laptop-ka/Chromebooks-ka ee iskuulada, maaskarooyinka wajjiga, samaacadaha dhagaha ee dhawaqa kansala, buugaagta qoraalada, iwm.
3. Samee qorshe isgaarsiineed oo loogu talagalay warbixinnada shaqooyinka iskuulka si qoysaska loogu wargeliyo horumarka ardayga.



Daryeelka carruurta ee bulshada maxalliga ah waxaa si toos ah u saameeya go'aannada ay iskuulada ka gaarayaan dib-u-furitaanka iskuulada ee deyrta.

Bixiyeyaasha daryeelka carruurta ayaa gacan ka geysan kara buuxinta baahiyaha qoysaska shaqeyta ee qaba carruur gaartay da'da iskuulka ee da'doodu tahay 5-12 kuwaas oo u baahan xulashooyinka daryeelka carruurta kuwaas oo la jaan qaadi kara jadwalka iskuulada deegaanka.

Qoysasku waxay hadda raadinayaan xulashooyinka daryeelka carruurta ee ka caawin kara waxbarashada fog/khadka ah in la siiyo carruurtooda da'da iskuulka gaartay.

Iskuulada waxay raadinayaan bixiyeyaasha daryeelka carruurta kuwaas shuraako kala noqon kara guusha carruurta inta lagu jiro musiibadaan.

